

محمد عبدالله فارح محمد

SAHAY AAKHIRO (@)



(LAMA DAABICI KARO AMA COPY RIGHT IYADOON OGOLAANSO LAGA HAYSAN MOHAMED ABDILAAHI FARAH)



Carshiga Ibliis : Ma ogtahay Walaalkayga Muslimka ahow in ay kusoo aroortay Xadiis Saxiix ah in Ibliis Carshigiisa uu ciidamadiisa ka kala diraa yahay Badda Dhexdeeda halkaasna uu ka kala Diro, waxaana agtiisa ugu sharaf badan hadba ka ugu badan Fidnaynta uu dadka fitnaynayo ee Diintooda ka fasahaadinayo , mase ogtahay in Fitnooyinka ugu waaweyn ay tahay in qofka Diintiisa laga saaro oo uu ka gaaloobo , iyo In uu Dhiig xaq daro ah Daadiyo una dagaalamo Casabiyad Reer ama wax la mid ah (Jamciyadda Al-Nuhuud)

Gadgadoonka Fidnada : Waxaa Rasuulka csw laga weriyay in Fitnooyinku ay isaga daba iman doonaan sida ay Habeenka Madowyadiisu isaga daba yimaadaan, waxaana la ina amray in aynu udegdegno Acmaasha Saalixaadka ah, waxaana dhici doonta in Qofku uu waabariisto isagoo Mu'min ah uuna Galabaysto isagoo Gaal ah , ama uu Galabaysto isagoo Mu'min ah uuna waabariisto isagoo Gaal ah , taasna waxaa sababaya isagoo Diintiisa ku iibsana doona ama dhaafsan doona Dhaldhalaal adduunyo, walaalayaal Fitanta aakhiru-sebanka iyo Dhaldhalaalka adduunyo aan cibaadada illaahay iyo Acmaasha Wanwanaagsan xagooda uga cararo si aynu u badbaadno (Jamciyadda Al-Nuhuud)

Wax ka Baro Xaasaskii Rasuulka csw : Umu Salama Hinda Bintu Abii Umayata Illaahay haka Raali Noqdo'e , waxay ka mid ahayd Dadkii ugu Horeeyay ee soo islaamay iyada iyo Ninkeedii Abu-salamah , Markii ay doontay in ay Hijrooto Mushrikiintii reer maka waxay kala eryeen iyada iyo Ninkeedii waxaanay ka qaateen ilma yar oo ay dhashay , waxaanay sheegtay in muddo Sanad ah ay Subax kasta tegaysay meesha la yidhaahdo Abdax oo Makka ku taalay halkaas oo ay ka Ooyi jirtay ilaa Qoraxdu ka dhacdo , markaas ka bacdi ayay u naxariisteen oo ilmaheedii usoo celiyeen, waxaanay u hijrootay Madiina iyadoo ugashay Safar dheer oo dhib

badan,waxaanay ahayd Gabadhii u horeysay ee Madiina usoo hijrootay Ninkeediina waxa uu u dhintay dhaawac kasoo gaadhay Dagaalkii Uxud, ilaahayna waxa uu uga danbaysiiyay Rasuulka csw oo ay ka mid noqotay Xaasaskii Sharafta badnaa ee Rasuulka csw Alle haka raali noqdo'e (Jamciyadda Al-Nuhuud)

Jamaca iyo Salaadda: Sida Diinteenu inoo sheegtay Qofka ku tukada Jamaca Masaajidka Salaada Cishe waxa uu ka dhigan yahay Sidii Qof Habeenka kala badhkii Salaad iyo Cibaado u taagnaa , Qofka ku Tukada Jamaca Masaajidka Salaada Subax waxa uu ka dhigan yahay sidii Qof Habeenkii oo dhan u taagnaa Salaad , Walaalayaal jamaca salaada ee Masaajidka oo la ilaaliyo Gaar ahaan Ragga waxa uu leeyahay fadli aad u fara badan waxaana loo baahan yahay in aynu u dedaalo sidii aynu u ilaalin lahayn Jamaca Salaadaha (Jamciyadda Al-Nuhuud)

Su'aal :Rasuulka csw Markii la dheelmiyay muxuu kusoo arkay Samada Koowaad ilaa Samada todobaad ? Jawaab : Waxa uu kusoo arkay Samooyinkaas Rusushii ilaahay , isaga oo Samada 1aad kusoo arkay Nabi Adam csw Aabihii Basharka.Samada 2aadna Nabiyada kala ah Yaxye iyo Ciise csw.Samada 3aadna Nabi Yuusuf csw. Samada 4aadna Nabi Idriis csw. Samda 5aadna Nabi Haaruun csw. Samada 6aadna Nabi Muuse csw.Samada 7aadna Nabi Ibraahim csw. (Sh.Daahir Aw Cabdi)

Su'aal : Shiikh waa maxay Xukunka ka dhalanaya Kufsiga waxa loo yaqaano ? Jawaab : Kufsigu waa laba denbi oo waaweyn mar keliyana wada dhacaya kufsi iyo Sino waana xaaraan, waxaana ka waajibaya Laba Arimood Xadkii Sharciga ahaa oo ah In Haddii uu Guur Soo marayna Dhagax lagu dilo , Haddii aanu Guur soo marina Boqol jeedal lagu dhufto sanadna la Masaafuriyo, waxaa kale oo lagu yeelanayaa Gabadhaa uu Kufsaday Meherkeeda oo ah mid u dhigma kan lagu meheriyo Hablaha ama Dumarka la midka ah,Haddii Dil ka dhashana waxaa ka dhalanaaya In loo Qisaaso (Sh.Axmed Daahir Xasan Xuseen)

Saddex Saddex Ku Dawee : Haddii aad Dareento in lagugu Ibtileeyay Shahawaadka Salaadaada dib ugu Noqo oo Hagaaji waayo salaadaa Shahawaada daweysa xumaantana Reebta, Haddii aad Dareento Mushkilado iyo Khayrka oo lagu waafajin waayo Xidhiidhka idinka dhexeeya hooyadaa wanaaji oo dib u eeg waayo Baarinamada Hooyadu waxay ka mid tahay waxyaabaha Wanaajiya Qofka Noloshiisa, Haddii aad Dareento Cidhiidhi Adduunyo , Quraanka Akhri ntiisa badi .

Qore:MOHAMED ABDILAHY FARAX MOHAMED

TELL:907662530

PAGE:OGAALKA TAARIIKHDA

CHANEL:OGAAL SAN

FAAHFAAHIN DHEERAADA AH:MOHAMEDABDILAH .WEB.CO.IN

MOHAMEDABDILAH027@GMAIL.COM